

Imaanshaha Isbitaalka

Isbitaalka Royal Denatl Hospitaalka ee Melbourne wuxuu ku yaal 720 Swanston St, Carlton, oo ka soo-horjeeda Jaamacadda the University of Melbourne.

Irida weyn ee Isbitaalka laga soo galo ee Swanston St waxaa lagu iman karaa Wheelchair iyo baraam. Waxaa kaloo halkaas ka jira raambi laga bilaabo Lynch Street (waa hal dhinac marka laga yimaado Cardigan Street). Fadlan ka eeg khariidadda ku taal dhinaca gadaale ee faahfaahintan.

Gaadiidka Dadweynaha

Tareen isteeshanka ugu dhow Isbitaalka waa Melbourne Central. Laga bilaabo Melbourne Central, tareenka u raac ilaa Swanston Street ee xagga Jaamacadda the University of Melbourne. Taraamyada ag-mara Isbitaalka waxaa ka mid ah lambarada taraamyada 1, 3, 5, 6, 8, 16, 22, 64, 67 iyo 72. Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir transport information centre taleefanka 13 16 38 ama ka eeg www.metlinkmelbourne.com.au

Taxi


Meel taxiga laga raaco ayaa ku taal Grattan Street, o u dhow koonarka Swanston Street.

Baarkinka

Baarkinka mitirka leh ayaa laga helaa Swanston Street, Grattan Street iyo Cardigan Street. Xiddidaada waqtiga mitirka waxay u dhaxeeyaan hal ilaa laba saac. Baarinka ganacsiga ee baabuurta ugu dhow waa kan ku yaal koonarka Grattan Street iyo Cardigan Street.

Baarkinka Curyaanka

Waxaa jira laba boos oo baarinka curyaanka ah oo ku yaal Swanston Street, iyo sidoo kale laba boos oo min shan daqiiqo ah oo wax lagu dajiyo. Boosaska dheeraad ah ee baarkinka curyaanka waxaa laga helaa Lynch Street (waddo hal dhinac ah marka laga leexo Cardigan Street). Waxaa ka jira tiro yar oo boosaska baarinkada curyaanka Grattan Street iyo Cardigan Street.



Caafimaadka Afka waa Caafimaadka Wacan

Dental Health Service Victoria
Royal Denatl Hospitaalka ee Melbourne
720 Swanston St, Carlton, Vic 3053

Taleefanka: (03) 9341 1000

Wicid Lacag la'aan ah (miyiga) 1800 833 039

Adeegyada Degdegga ah: 1300 160 054

Adeegyada Degdegga ah saacadaha aan shaqdu jirin: (03) 9341 1040

www.dhsv.org.au

Publication date: March 2009

S/No: Somali 73185

Buug-tilmaameedka soo-booqdayasha Isbitaalka Royal Denatl Hospitaalka ee Melbourne



 dental health
services victoria

Dental Health Service Victoria waa haya'dda dowlad-goboleedka horseedka u ah caafimaadka afka ee dadweynaha, taas o kor-u-qaadaysa caafimaadka afka, adeegyada soo-gadashada iyo siinta daryeelka dadka Victoria.

Adeegyada Turjumaanka

Adeegyada turjumaanka waa laga heli karaa. Markii aad samaynayso ballantaada fadlan u sheeg shaqaalaha haddii aad u baahan doonto turjumaan iyo luqadda aad doonayso. Taas waxay shaqaalaha u ogolaanaysaa inay diyaariyaan turjumaan yimaada markii lagu daawaynayo. Haddii aad u timaaddo isbitaalka si degdeg ah, turjumaanka taleefanka ayaa la diyaarinayaa.

Daryeelka Bukaanku

Markii aad timaaddo Isbitaalka, waxaa lagaa doonayaa inaad timaado mid ka mid ah meelaha laysku daaweeyo oo kala ah Heerka 1aad, 2aad ama 4aad (ka eeg shaxda, midigta). Markaad timaaddo, fadlan liftiga u raac heerka saxdaa waxaadna raacda calaamadaha meelaha qaabilaadda.

Isbitaalka Royal DenatI Hospitaalka ee Melbourne waa isbitaal waxbarid. Taas macnaheedu waxa weeye in bukaan-socodka ay daaweyn karaan xirfad-yaqaanada caafimaadka ilkaha oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin ardayda, takhasusleyaal oo tababar ku jira ama shaqaalaha kale ee tababaran.

Fadlan la soco waqtiyada halkaas la joogo waa kuwo ay jiraan dalabyada adeegyada degdegga ah ayadoo bukan-socodka la siin karo ballan uu ku yimaado maalin kale. Waxaan kugula talinaynaa inaad soo wacdo **1300 160 054** si loo qiimeeyo baahiyahaaga ka hor intaadan imaan Isbitaalka. Taas waxay yaraynaysaa waqtiga sugitaanka.

Daryeelka degdegga waxaa heli kara oo kale xubnaha u xaq leh ee bulshada in ka badan 60 bukaan-socod-eeqtooyinka daaweynta ilkaha dadweynaha oo ku yaal Victoria. Xubnaha bulshada waxay ka heli karaan bukaan-socod-eeqtada ugu dhow ayagoo waca **1300 160 054** ama ka eega www.dhsv.org.au

Heerka 1aad/ Dabaqa kowaad

Adeegyada Degdegga ah (Daryeelka Kowaad)

Dhibaatooyinka ilkaha kuwaas oo u baahan daaweynta ilkaha oo degdeg ah waxaa ka mid ah:

- shilalka ay ku jiraan dhaawaca gaara wejiga iyo ilkaha
- bararka ilkaha, ee afka ama wejiga
- dhiig-bax daran oo ka imaanaya ciridka ama la socda ilka saaridda
- ilka-xanuun daran iyo xanuun

Qaybta Daaweynta Ilkaha ee Guud

Daaweynta, nadiifinta, buuxinta, ka-saaridda iyo ilko-gelinta.

Adeegyada gaarka ah

- **Simidda** – simidda ilkaha
- **Daaweynta afka** – daaweynta cudurada bushimaha, canka, carrabka iyo daanka
- **Daaweynta Cirridka** – waa daaweynta cudurada cirridka oo daran
- **Ilko-gelinta** – waxaa ka mid ah ilko-gelinta, taajaynta iyo isku-dhaweynta
- **Daaweynta Ilkaha Carruurta** – daaweynta carruurta qaba u baahan daaweyn ilko, daawo iyo baahiyo kale
- **Daaweynta xididdada ilkaha** – daaweynta xidid mareenka ilkaha

Heerka 2aad/ Dabaqa labaad

Bukaan-socod-eeqtada Waxbaridda ardayda Jaamacadda

Daaweynta waxaa bixiya ardayda jaamacadda ayagoo uu kormeerayo xirfad-yaqaan caafimaadka afka oo qadiimi ah. Adeegyada la bixiyo waxaa ka mid ah Adeegga Daaweynta Ilkaha Dugsiyada, adeegyada degdegga ah iyo kuwa guud.

Heerka 4aad/ Dabaqa afraad

Qaybta Qalliinka Maalinta

Saalooyinka qalliinka.

Qalliinka Afka

Hababka qalliinka kakan oo ay ka midka yihiin ilkaha, afka ama daamanka.

Kharashyada

Haddii aad haysato kaarka daryeelka caafimaadka (health care card) ama kaarka ka-dhaafka howlgabka (pensioner concession card), waxaad heli kartaa adeegyada ilkaha ee dadweynaha ee Victoria ka jira. Dhammaan carruurta jirta 13 sano ama ka yar way u xaq leeyihiin daryeelka ilkaha ee dadweynaha.

Waxaa jira kharashyo la xiriira daryeelka ilkaha ee dadweynaha. Kharashka waxaa sameeya dowladda sannad kasta. Baahiyaha gaarka ah qaarkood waa inaysan dhiibin kharashyadan. Dhakhtarkaaga bukaan-socod-eeqtada ayaa kaala hadli doona kharashyadan ka hor intaysan bilaaban daaweyntu.

Haddii aadan haysan kaarka daryeelka caafimaadka (health care card) ama kaarka ka-dhaafka howlgabka (pensioner concession card), waxaad weli Royal Dental Hospital of Melbourne ka heli kartaa daaweynta ilkaha ee degdegga ah oo laga qaado ujradda mid ah dhakhtarada ilkaha ee gaarka ah. Xaaladdaas oo kale, lacag-bixinta-qayb ayaa loo baahan yahay ka hor intaysan bilaaban daaweyntu, ayadoo lacagta harsan la bixin doono dhammaystirka booqashada.

Daryeelka ilkaha oo ay bixiyaan ardayda jaamacadda oo uu kormeerayo xirfad-yaqaanada caafimaadka ee tababaran waa u lacag la'aan xubnaha bulshada.

Saacadaha shaqada

Adeegyada Degdegga ah – Maalmaha shaqada –
8:00 am ilaa 9:15 pm

Adeegyada Degdegga ah – Maalmaha aan shaqadu jirin iyo Fasax-weynaha – 9:00 am ilaa 9:15 pm

Saacadaha Bukaanku-socod-eeqtada – 8:30 am ilaa 5:00 pm